

MACLUUMAADKA CORONAVIRUS

Su'aalo? La hadal 2-1-1



WAA MAXAY "NOVEL CORONAVIRUS"?

COVID-19 waa coronavirus cusub kaasi oo bilaabay inuu dadka qaado Diisambar 2019. In kastoo khabarada caafimaadku ay maalin kasta fayraska wax ka baranayaan, wali waxa harsan wax badan oo ay tahay in la ogaado.

Astaamuhu waxay la mid yihiin kuwa hargabka; waxaana kamid ah xummad, qufac, iyo naqaska oo qofka ku adkaada. Dadka intooda badan way ka bogsadaan iyagoo guriga jooga, laakiin wuxuu keeni karaa xanuun daran iyo oofwareen dadka qaar.



Xumad



Qufac



Neefsiga oo yaraata

HALKAN MIYAYNU KHATAR UGU JIRNAA?

Halistu way hoosaysaa dadka caadiga Oregon.

Saraakiisha caafimaadku waxay ka warwar qabaan dadka laga yaabo inay la kulmeen fayraskan kuwaasi oo da' ah ama dhibaatooyin caafimaad qaba.

SIDEE AYUU KU FAAFAA?

Fayrasku waxa uu u faafaa sida hargabka oo kale, marka qof xanuunsanayaa uu qufaco ama uu hindhiso isaga oo u dhaw qof kale (6 fuudh). Qof qaba fayraska ayay u badan tahay inuu u gudbiyo dadka kale kaas oo qaba astaan sida hargabka oo kale ah.



SIDEE AYAYNU UGA CAAFIMAAD QABI KARNAA?

Qaabka ugu wanaagsan ee aad ku dili karto jeermisyadani waa inaad si joogto ah u maydho gacmahaaga. Ka fogow ku taabashada indhaha, sanko, ama afka gacmo aadan maydhin. Gurigaaga joog haddii aad xanuun dareemayso. Afka iyo sankaba dabool haddii aad qufacayso ama hindhisayso.



MAXAAN SAMAYN KARAA SI AAN IMINKA UGU DIYAAR GAROOBO?

Wax ka ogow fasaxyada xanuunka ee cidda aad u shaqayso iyo xeerarka qaabka loola xidhiidho. Waxa aad yeelataa qorshe daryeelka ilmaha haddii ay tahay in caruurtaadu ay guriga ka joogaan dugsiga. Waxa aad xaqiijisaa inaad haysato cuntada iyo dawooyinka aad u baahan tahay hadii ay tahay inaad guriga joogto. Soo ogow jaararka laga yaabo inay u baahan yihiin caawimo dheeraad ah, sida dadka waayeelka ah ee kalidood meel deggan.

Wixii macluumaad ah ee ugu danbeeyay, booqo multco.us/covid19.